

Barnmorskemottagningar

Patientinformation: Lokalbedövning med Emla inför insättning och uttag av p-stav, översatt till somaliska.

Datum: 2026-01-21

Kabaabiyeynta qaybta gaarka ah ka hor gelinta ama ka saarista qalabka ka hortagga uurka ee p-stavka

Waxaad ka iibsana kartaa farmashiyaha balastarka kabaabiyada ama kareemka kabaabiyada (**Emla®** eller **Tapin®**) adigoo aanan wadanin warqad dhakhtar. **Mari kabaabiyada 2-4 saacadood ka hor ballantaada** si ay u yeelato saamaynta ugu fiican.

Qalabka ka hortagga uurka ee P-stavka waxaa si sare loo geliyaa maqaarka hoostiisa, **gudaha cududda/gacanta qaybteeda sare**. Waxaa la geliyaa gacanta aadan wax ku qorin (Gacanta aadan ugu isticmaalka badnayn)

Sida loo helo meesha saxda ah ee kabaabiyada

1. Laab cududda/gacanta ilaa ay gaarto xagasha 90 darajo
2. Ka bilow cirifka xusulka, eena cabbir 10-12 cm adigoo u soconaya dhinaca jirka.
3. Ku dheji balastarka kabaabiyada ama kareemka kabaabiyada sida sawirka ku tusinaya.

4. Haddii aad dooneysid in aad saartid qalabka ka hortagga uurka ee P-stavka waxaa muhiim ah in aad ogtahay meesha uu P-stavka yaalo oo aad kabaabiyeesid dhamaan aaggaas.



Marka la isticmaalayo balastarka kabaabiyada

Ku dheji **laba balastar** si ay goobta kabaabiyada u daboosho dhammaan meesha qalabka ka hortagga uurka ee p-stavka la gelinayo ama laga saarayo, fiiri sawirka.



Marka la isticmaalayo kareemka kabaabiyada(tiyuub)

1. Mari **dhammaan waxa ku jira tiyuubka** si siman, adigoo u marinaaya sida xarriiq isku mid ah dusha aaggaas.
2. Ku dabool kareemka **balastar dabool ah** (badanaa waxa uu ku jiraa baakadka).
3. Haddii loo baahdo, waxaad sidoo kale ku dabooli kartaa **xalleef caag khafiif** ah si loo helo ilaalin dheeraad ah.

Su'aalo? La xiriir xaruntaada umulisoooyinka.